



# Xiritaankii Iskuulka Oo La Kordhiyey Ilaa Dhammaadka Sanad-dugsiyedka

Abriil 8, 2020

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Iyada oo aan jawaab laga bixinayo dhibaatada caafimaad ee xanuunka COVID-19 ee gobolkeena, maanta [Guddoomiyaha Gobolka BrownWaaxda Waxbarashada Gobolka Oregon](#) waxa ay shaaca ka qaadeen in aan iridaha dhismayaasha iskuuladeena la furin doonin mar labaad ilaa inta ka dhiman sanad-dugsiyedka 2019-20. Waxa aanu xiisi doonaa dhammaan ardaydayadii iskuulada, laakiin caafimaadka iyo nabadjelyada ardayadayada, macalimiinta, shaqaalaha iyo sidii ay bulshadu u dhan tahay taasi oo ah mudnaantayada koowaad.

Waxaan aad ugu faraxsanahay ugu dambeyn inaan tallo bixin ka helnay Guddoomiyaha Gobolka iyo Waaxda Waxbarashada Gobolka Oregon. Marka aad eegto go'aanka lagu xidhay iskuulada inta ka dhiman sanad-dugsiyedka, iyo tallo bixinta waxbarashada guryaha lagu qaadanayo iyo dib u eegista lagu sameeyey shuruudaha qalin jabinta, waxa aanu diirada saari doonaa habka cusub ee PPS-HD, kuna salaysan in waxbarashada iyada oo guryaha la jooga ardaydu qaataan si loo sii wado dadaalada lagu gaadhsiinayey adeegyada ardayda.

Dhammaan ardayda, gaar ahaan ardayda ku jirtay fasalada 12naad, waa in la socdaan faahfaahin dheeraad ah iyo tallaabooyinka labaad ee la xiriira dhibacaha derejada casharada iyo fasaloododa. Fadlan waxaad ogaataan in ujeedadayadu ay sal u tahay sidii loo taageeri lahaa ardayda sidii ay uga midho dhalin lahaayeen sidii ay u gaadhi lahaayeen meeshii laga rabay. Waxaan jecelayah inaan aqoonsado in ardayda fasalada 12naad ee dugsiyadeena sarre, gaar ahaan, in ayna helin doonin munaasabadihii dhaqanka ahaa waqtigani aan ku jirno. Waxa aan sii wadi doonaa inaad taageerno mid kasta oo ka mid ah ilaa uu ka qalin jabinayo iyo waliba waqtiga kala guurka ee ka dambeeyaa dugsiga sare, iyada oo aan u rajeynayo in abuuri doonaan dariiqooyin ay ku aqoonsadaan iyada oo u dabaaldegaya sanadihii badnaa ee sida wanaagsan u shaqeeyeen.

Dugsiyda degamadu waxa ay hadda heleen Waaxda Waxbarashada Gobolka Oergon [Dariiqooyinka Lagu Qalin Jabinayo 2020](#); taasi oo duluceedu tahay tilmaamaha ay raaci doonaan ardayda fasalada 12naad ee dugsiyadeena sarre. Waxaan idiin cadeynayaa, marka laga reebo ardayda fasalada 12naad ee haysta dhammaan dhibicihii derejada ee looga baahnaa in ay ku qalin jabiyan, ardayda bartay wixii looga baahnaa ee sanad-dugsiyedka 2019-20 wali ma dhammaanayo. Inta ka dhiman sanad-dugsiyedka waxa uu sii socon doonaa waqtiga kala guurka ah ee qofku fasalka casharada ku qaadan jiray iyo ardayda casharada ku qaadanaya guryahooda barnaamijka [PPS-HD](#), ee ku salaysan taasi oo todobaadkani la bilaabay. Barnaamikani oo ay gadh wadeen ka yihiim macalimiinteenaa ma daalayaasha ahi, waanu sii wadi doonaa sidii aan si joogta ugu xiri lahay ardayda si loo siiyo fursadihii waxbarashada ee ay u baahnaayeen.

Hore ayaa loo soconayaa, waxa aan diirada saari doonaa sidii ardayda looga caawin lahaa caafimaadka shucuurta bulshada ee ardaydeena iyo sidii ay adeegayadaasi u heli lahaayeen. Waxa aanu sii wadi doonaa in addeegyadii cunta bixintu ee maalmaha Isniinta ilaa Jimcaha todobaadkiiba la sii wado, iyo haddii ardaygaagu u baahan yahay kumbuuyatar laptop ah ay ka soo qaadan karaan todobaadkani iyo ka xiga; waxaad ka heli kartaa taariikhaha la qaybinayo, waqtiga iyo goobaha lagu qaybinayo marka aad [gujiso halkani](#). Macluumaadka ku saabsan dhammaan gargaarka iyo agabka aanu bixin waxaad ka heli kartaa halkan [pps.net/coronavirus](#).

Waxaan ogsoonahay in dhammaanteen aan doorbidi lahayn in aan ku noqon fasaladii... ugu dambeyn, maalintaasi way soo noqon doontaa. Ilaa iminka, waxaan idiinka mahadcelinayaam samirkiina, dabacsanaantiina iyo fahamkiina. Dhamaantiina waxaad ka ciyaareyseen kaalin muhiim ah sidii aad imtixaanka ina soo foodsaray uga guuleysan lahayn. Fadlan guryaha jooga idinka oo nabdqaba, waxaan jecelnahay inaad nala socodsiisaan sida aanu hawsha u wadn haddii aanu nahay- macalimiin, iskuul ama hoggaamiyaha xarunta dhexe- iyo sida aan idiin taageri karno ee ugu wanaagsan.

Daacadnimo,



Guadalupe Guerrero  
Superintendent